Xannaannooyinka iyo daryeelka carruurta ee Nyköping

Ku socota waalidiinta Nyköping

Dalbashada iyo gelidda safka

Ilmahaaga waxay kaa qabanaysaa xannaannadu haddii aad waxbarasho ku hawlan tahay ama aad shaqeynayso ama uu ilmahaagu baahi khaas ah u qabo in lagaa qabto. Soo bandhigan laguu soo jeedinayo in lagaa qabto ilmaha waxaa uu soconayaa marka uu ilmahaaga gaaro hal sano jir ilaa inta laga gaarayo fasaxa xagaaga ee ilmuhu uu ka bilaabayo fasalka 7:aad.
Codsiga dalbashada waxaad ka helaysaa bogga internetka ee www.nykoping.se. Booska bannaan oo ilmaha ay xannaannada kaaga qabato, wuxuu qaadanayaa wakhti ah afar bilood oo laga bilaabo marka aad soo xereyso dalabkaaga. Soo bandhigan in lagaa qabto ilamaha, waxaa loo dirayaa oo keli ah ilmaha ka diiwaan gashan ama deggen degmadan. Marka aad heshid soo bandhigan in ilmaha lagaa qabanayo, waxay tahay dammaanad qaad ay degmadu hore u ballan qaaday sidaas.
Qoyasaska doonaya in ay u soo guuraan degmadan Nyköpings way isa sii gelin karaan safka ilmaha ee xannaannooyinka iyo daryeelka carruurta loogu jiro. Qeybinta boosaska bannaan waxaa laguugu tixgelinayaa xannaannada kuugu dhow iyo taariikhda aad degmada u soo guurtay. Haddii uu qoys ka guuro degmada, sida caadiga ah way boosaskaasi wuu bannaannaanayaa. Waana inay ogeysiis sidaas ku lagu bixiyaan.

3–5- sano jir

Xannaannooyinka degmooyinku leeyihiin waxaa lacag la’aan baa ilama lagu hayaa15 saacaddood/sitimaankiiba ilmaha 3–5- sano jirka ah (waxaa laga soo bilaabayaa xilliga jiilaalka ee ilmuhu uu buuxiyo sedex sano jir).
Waxaa la tirnayaa sanad dugsiyeedka ee ma aha sanadka caadiga ah (sida oo kale marka ay iskuulladu fasax ku jiraan xannaannaduna way xiran tahay, hawl kama socoto).

6-sano jirka

Fasalka lix jirrada ee iskuulka ka horreeya lacag la’aan baa ilmuhu ku dhiganayaa 3 saacaddood/maalinkiiba ama 525 saacaddood/sannadkiiba laga soo bilaabo xilli dugsiyeedka uu ilmuhu buuxiyo lix sanno jir.

Xannaanno ku meel gaar ah

Haddii ay dhacdo in ilmahaagu u baahan yahay in uu xannaannada tago maalmo khaas ah oo aanu lahayn jadwal joogto ah, waxaa lagaaga qabanayaa ilmaha xannaanno ku meel gaar ah.

Nyköpings kommun
611 83 Nyköping
telefon 0155-24 80 00
kommun@nykoping.se
www.nykoping.se

Nyköping

Xannaannada ku meel gaarka ah waxaa lagu hayaa carruurta dhigata fasalka lix jirrada ee iskuulka ka horreeya iyo wakhtiga fasaxa ee xagaaga inta laga gaarayo in ilmuhu uu bilaabo fasalka 7:aad. Xannaannada ku meel gaarka ah waxay ilmaha qabanaysaa kedib marka heshiis isla gaaraan waalidka iyo qofka ka madaxa hawlaha xannaannada. Qiimaha lacagta kharashka ee laga bixinayo xannaannada ku meelgaarka ah waa 40 kar/ maalintiiba Cunnada ilmuhu cunayo waxay ku jirtaa qiimahan kharashka lagaa qaadayo.

Xannaannooyin furan wakhtiga firaaqada ah

Marka uu dhammaado wakhtiga iskuulku, wuxuu ilmahaagu tegi karaa oo qeybgeli karaa xannaannooyin furan wakhtiga firaaqaha ah, inta uu ku jiro iskuulka aasaasiga ah xilli dugsiyeedkiisa, laga bilaabo xilliga jiilaalka, fasalka 4:aad, ilaa laga gaarayo xilliga dugsiyeedka xagaaga, marka ilmuhu uu bilaabo fasalka 7:aad. Fasaxyada iyo maalmaha ay macallimiintu leeyihiin tababarro haddii ku beegmaan xilli dugsiyeedka dhexdiisa, way furnaanayaan xannaannooyinku. Kharashka laga bixiyo xannaannooyinka wakhti firaaqaha ah, waxaa toos loo siinayaa waaxda qaabilsan hawllaheeda. Kaarka qiimahiisu waa 50 kroon/xilli dugsiyeedkiiba. Cuntadu wax macaash ah oo lagu dul saariya, ma jiro ee qiimihii ay ku fadhiday uun baad bixinaysaa.

Boosaska wakhtiga fasaxa

Boosaska wakhtiga fasaxa ah ee xannaannooyinka waxaa lagu qabanayaa carruurta laga bilaabo bisha juuliyo iyo fasaxa xagaaga. Boosaska wakhtiga fasaxa ah waxaa ilmaha lagu qabanayaa, marka laga bilaabo xilli dugsiyeedka jiilaalka ay carruurtu bilaabayaan fasalka lix jirrada ka horeeya inta aanay iskuulka bilaabin ilaa laga gaarayo fasaxa xilli dugsiyeedka xagaaga oo caruurtu markaas bilaabayaa fasalka 7:aad. Codsiga iyo dalbashada waxaad soo marinayaa gacanta ku haya arrinta xannaannada ilmahaaga, lacagta aad bixinaysna waxaa lagu habeynayaa sida waafaqsan xeerka qiimaha uu qofku bixin karo ee dhaqaalihiisa lagu jaan go'iyay.. Codsiga qabashada ee fasaxa ciiddaha diinta kiristanaka waxaa la keenayaa kowda november, fasaxa xagaaga isna waxaa la keenayaa codsigiisa kowda maajo.

Waalidiinta fasaxa ku jira ama shaqo la'aanta haysto ee shaqo raadinta ku jira.

Ilmaha ku jira fasalka lix jirrada iyo ilmaha waalidkoodu guriga ku hayo, xilliga uu waalidku fasax waalidiinta ku jiro iyo sida oo kale waalidiinta shaqo la' aan haysto ee shaqo raadraadinta ku dhex jira carruurtoodu, waxaa lagu soo koobay inay xannaanada ay tegi karaan uun ugu badnaan 15 saacaddood/sitimaankiiba. Marka uu dhasho ilmo kale, ama reerka uu ku soo kordho ilmo la soo korsanayo, waxaa uu ilmihii hore ee guriga joogay xaq u leeyahay in uu hal bil sii wato qorshihiisii hore oo uu ku socdo jadwalkiisa caadiga ahaa, oo ah sidiisii hore ee uu xannaannada u tegi jiray in uu u tago.

Isbedelka xaaladda qoyska

Haddii xaaladda qoyska wax iska bedelaan, tusaale ahaan, ay timaad isfuriin ama guur cusub, waxaa waajib ah in la soo wargeliyo gacan ku hayaha arrintu ay khusayso, maadaama laga yaabo inay saameyn ku yeelan karto qiimaha kharashka laga bixiyo xannaannada. Haddii uu isbedel ku yimaado dakhliga dhaqaalaha ee soo galaya qoyska, waxaa waajib ah in la keeno caddeynta kugu saabsan labada lammaaneba dhaqaalahooda.
Haddii ay wax iska bedelayaa sidii joogtada ahayd ee ilmuhuu uu xannaannada u imaan jiray, waa in jadwalka cusub la keeno.
Jadwalka joogista waa in ay ku caddahay wakhtiga shaqada iyo waxbarashada aad ku mashquulsan tahay iyo wakhtiga macquulka ah ee keenista iyo ka soo kaxaynta ilmaha.
Kordhinta wakhtiga joogista ilmaha ee xannaannada waa in lagala tashadaa qofka madaxa ka ah xannaannada.

Heerarka qiimaha kharashkala

Qiimaha kharashka loo dejiyay inuu ugu badnaan qofku bixin karo

- Qiimaha kharash ee la bixinayo waxaa lagu jaango'yinayaa boqolkiiba qeyb ka mid dhakhliga dhaqaale ee qoyska guud ahaan soo gala, intaan cashuurraha laga go'yinin..
- Cashuurta dakhliga 42 000 kr.
- Wixii qiimaha kharashka ee ka hooseeya mara 75 kar lama soo dalacayo.
- Qiimaha kharashka waxaa laga bilaabayaa maalinta ugu horeysa ee ilama la keeno xannaannada ee waalidku in uu tababar ahaan ula joogo ay tahay.
- Qiimaha kharashka waxaa la bixinayaa12 bilood/sanad.
- Qiimiha kharashku hoos uma dhacayo, haddii ilmuhu fasax ka qaato xannaannada ama sababo kale awgeed uga maqnaado.
- Waa in hal bil oo ogeysiin ah ee ka bixidda, haddii ilamaha laga saarayo xannaannada. Ogeysiinta ka saaridda ilaha waxaa lagu bixinyaa qoraal, waxaana loo dirayaa gacan ku hayaha arrinta xannaannada ilmaha.
- Degmadu waxay iyana ogeysiis ku bixin kartaa ka joojinta ilmaha xannaannada, haddii laga faa'iideysan kari waayo ama la bixin waayo kharashkii.
- Kharashka waxaa wada bixinaya labada waalid, haddii uu ka dhexeeyo mulkiga wada lahaansha waalidnimo, labaduba waxay u baahan yihiin xannaannada ilmuhu ku jiro, haddii ilmuhu uu marba mid la soo joogayo, markaas waxaa kharashka lagu jaango'yinayaa qiyaas boqolkiiba qey ka tirsan dhaqaalahooda oo la isku miisaamayo midba kale kale inta uu qiyaas ahaan ka yahay. Kharashkan ay bixinayaan labada waalid kama badan karo kharash loogu talogalay hal boos oo xannaanno ah iyo sida waafaqsan sharcigu dejiyay qiyaasta ugu badan ee aanu kharash xannaanno dhaafin karin..

Ilmaha, waxbarashada iyo dhaqanka waxaa sanadkiiba lagu samaynayaa qiimeyn , macluumaadka dhaqaale ee aad u soo gudbisayna waxaa loo dhiibayaa gacan ku hayaha arrinta

xannaannada ee ilamaha, waxaana loo sii gudbinayaa oo kale xafiiska cashuuraha.
Xarumaha xannaannooyinku waxay xaq u leeyhiin in ay albaabada u xiraan sanadkii afar maalmood, oo ay shaqaaluhu qaataan tababarro iyo qorsheynta mustaqabalka hawlaha xannaannada. Xarumaha iskuulka ee xannaannooyinka ahina waxay xiran yihiin laba maalmood/sanadkiiba. Wax kharash ah oo hoos u dhacay ma jiro, maalmahaas awgood.

Hawlaha xannaannooyinka ee 1– 5 sano jirka

Kharashka xannaannooyinka iyo guryaha ilmaha lagu hayo

- 1 cunug – 3% dakhliga ku soo gala – laakiin aan ka badnaan karin 1 260 kar/bishiiba
- 2 cunug – 2% ku soo gala – laakiin aan ka badnaan karin 840 kar/bishiiba
- 3 cunug 3 – 1% ku soo gala – laakiin aan ka badnaan karin 420 kar/bishiiba
- 4 cunug – wax kharash ah lagama bixinaayo

Cunugga 1:aad = Waa kan qoyska ugu yar.

Kharashka 3–5-sano jirka, ku jira xannaannooyinka dawladd
Xannaannooyinka dawladda ee 3–5- sano jirka ah, waxaa la dalban karaa uun hal mar xilli dugsiyeedkiiba.

- Waalidiinta dalbanaya xannaannooyinka ilmaha lagu haynayo 15 saacaddod/sitimaankii xilli dugsiyaadka, wax lacag ah oo ay bixinayaan ma jirto. Xannaannooyinka dawladdu leedahay ilamaha ma qabanayaan xilliyadda fasaxa iskuulladu yihiin waalidiintaas..
- Waalidiinta ay ilmahoodu baahi ay qabaan oo u khaas ah awgeed ugu baahan xannaannada ilaa 15 saacaddood/sitimaankii, laakiin ka badan 525 saacaddood/sanadkiiba, waxay bixinayaa qiimiime buuxa oo ah bilaha.
- Waalidiinta leh baahi ka badan 15saacaddood/sitimaankii iyo 525 saacaddod/sanadkii waxaa loo samaynayaa rakhiisin kharashka la bixiyo oo ah 30 % oo u dhigmaysa 1/9 – 31/5. Kharashka guud ee laga qaado ilamaha xannaannada ku jira bilaha juuni, juuliyo och ogosti.

Xannaannooyinka iskuulka

Kharashka xarumaha wakhti firaaqaha iyo qoysaska ilamaha guri ku haya

- 1 cungu – 2% dakhliga ku soo gala – laakiin aan ka badnaan karin 840 kar/ bishiiba
- 2 cunug – 1% dakhliga ku soo gala – laakiin aan ka badnaan karin 420 kar/ bishiiba
- 3 cunug – 1% dakhliga ku soo gala – laakiin aan ka badnaan karin 420 kar/ bishiiba
- 4 cunug – wax kharash ah laga qaadi maayo

Cunuga 1:aad = Waa cunuga ilmaha guriga jooga ugu yar.
Kharashka waxaa la bixinayaa marka laga bilaabo bisha 1 ogosti marka uu ilmuhu bilaabo fasalka lix jirka ee iskuulka ka horreeya.

Fasaxa waalidnimo iyo shaqo la’aanta

Ilmaha iskuulka dhigta ee ku jira fasallada F-3, oo waalidkoodu ay ku jiraan fasaxa waalidiinta ama aanay shaqo haysan oo raadraadsanayaan shaqo, waxay xaq u leeyihiin xannaannadu inay ilamaha ka qabato ugu badnnaan 10 saacaddood/sitimaankiiba. Waxaa jadwal isla samaynaya waalidka iyo qof madaxda ka ah xannaannada.

Qiime dhimista

Si lagaaga dhimo kharasha lagu bixiyo xannaannada waxyaabahan bay ku xiran tahay:

1. Ilmaha guriga joogaa haddii ay walaallo la yihiin ilmo kale, sida korka sare ku xusan.
2. Ilmaha oo ku kala jira xannaannooyin gaar loo leeyahay iyo kuwo dawladdu leedahay, oo ay khusayso xeerka qiimo jebinta ee walaalluhu.
3. Ilmaha baahi khaas ah awgeed ugu baahan kaalmo ee dhigta fasalka lix jirka ee ka horreeya iskuulka (sida waafaqsan sharciga iskuulka 2a qeybta 9§) oo lagu meeleeyay 15 saacaddood sitimaankiiba ama 525 saacaddood sanadkiiba ma bixinayo wax kharash ah. Haddii uu xannaanadda wakhtiga uu joogayaa ka badato 15 saacaddood waxaa uu bixinyaa kharash waafaqsan sida loo dejiyay xiriirka dakhliga iyo kharashka ugu badan ee qof bixin karo, taasi oo lagu sameeyay kharash dhimis ah 30%. Kharashka oo buuxa ayuu bixinayaa bilaha juuni, juuliyo iyo ogosti.

Caymiska

Degmada Nyköpings waxay saxeexday caymiska shilalka oo khuseeya carruurta ku dhex jira hawlaha iskuulka ama hawlo kale oo la xiriirra hawlaha wakhtiga iskuulka. Warbixin faahfaahsan waxaad ka helaysaa oo aad ka akhrisataa: www.nykoping.se

Gunnada haynta ilmaha

Halkii aad ilamaha ka geyn lahayd xannaannooyinka waxaa kuu bannaan in aad ku qaadato gunnada haynta ilmaha carruurta da’doodu u dhexeysa 1–3 sano jir. Fiiri xeerka u khaaska ah www.nykoping.se

Nala soo xiriir

Haddii aad hayso wax su’aallo ah, nagala soo xiriir fadlan xannaannada iyo daryeelka carruurta gacan ku hayayaasha.

- Ketty Dahlén 0155-24 85 21, ketty.dahlen@nykoping.se
- Elisabeth Wiik 0155-24 80 65, elisabeth.wiik@nykoping.se
- Annette Fröding 0155-24 80 54, annette.froding@nykoping.se
- Zenitha Caftemo 0155-24 85 17, zenitha.caftemo@nykoping.se

Carruurta da’doodu tahay 1–5 sano jir ee baahi khaas ah u qaba in taageero loo fidiyo iyo weliba gunnada haynta

- Anna Sieurin 0155-24 86 28, anna.sieurin@nykoping.se